Fiiro gaar ah: Dokumentigani wuxuu ka kooban yahay dhawr bog waxaana ku qoran macluumaad muhiim ah oo ku saabsan xuquuqdaada muddada hubinta sooyaalka qofka; waxa ay suurtogal tahay inuu qofku ku lumiyo u qalmitaanka, sida go’aan loo gaaro, iyo natiijooyinka ka soo bixi kara.

Dokumentigan waxa ku qoran macluumaad dheeraad ah oo onlayn ah oo wali la isticmaali karo haddii aad ilaashato boggan. Haddii aad daabacato dokumentigan, dhammaan linkiyada macluumaadka onlaynka ah waxay ku qoran yihiin bogagga u dambeeya.

Haddii linki dokumentigan ah uu ku geeyo foom ay abuurtay Qaybta Hubinta Sooyaalka, waxaad arki doontaa linkiyo dheeraad ah oo tarjumaado ku gaynaya. Haddii linkigu ku gaynayo websayt, hubi bartaasi si aad u ogaato haddii uu ku qoran yahay luuqad aan Ingiriisi ahayn.

## BAYAANKA OGGOLAANSHAHA DALBADAHA DARYEELKA TOOSKA AH HUBINTA SOOYAALKA

**Adiga, ka dalbade ahaan, waxaad oggolaanaysaa waxa soo socda:**
Aqbalaaddayda hubintan sooyaalku waxay awood u siinaysaa Qaybta Hubinta Sooyaalka (Background Check Unit, BCU), iyadoo ka wakiil ah Waaxda Oregon ee Adeegyada Aadanaha (ODHS) iyo Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA), inay bilawdo baaritaano dhanka dambiyada ah, oo ay ku jiri karto hubinta diiwaanada dambiyada ee heer qaran oo u baahan faro-dhigitaan, iyo inay ka hesho natiijooyinka Bilayska Gobolka Oregon iyo FBI-da.

Aqbalaaddayda hubintan sooyaalku waxay awood u siinaysaa BCU inay igu samayso hubinta xadgudubka qof wayn. Haddii shaqadaydu shardi ka dhigayso (wixii bixiye ODHS ah, shaqaale taageerada shakhsi ahaaneed ee OHA, ama bixiye OHA oo toos ula macaamila carruur), aqbalaaddayda hubinta sooyaalku waxay awood u siinaysa BCU inay igu samayso hubinta tacaddiyada ilme. Wixii macluumaad ka soo baxo hubinahan tacaddiga waxa dhici karta in lala wadaago hay’adda shatiga bixisa ee uu khuseeyo dalabkan.

Aqbalaaddayda hubinta sooyaalku waxay awood u siinaysaa BCU inay codsato oo hesho wixii warbixino ah ee la xiriira dhallinta, bilayska, maxkamadda ama baaritaanka ee loogu baahan yahay in la dhammaystiro hubintan sooyaalka. Haddii ay dhacdo in BCU ay ogaato arrimo ama xaalado keenaya luminta u qalmitaanka, sida tacaddi, BCU waxa dhici karta inay igu ogaysiiso cinwaanka, lambarka taleefanka, ama iimeylka aan siiyey si ay u hesho macluumaad dheeraad ah.

Aqbalaaddayda hubintan sooyaalku waxay awood u siinaysaa BCU inay tusi karto macluumaadkan lagu bixiyey codsigan ama shaqadan hubinta sooyaalka wixii wakaalad

caddaaladda dembiyada qaabilsan ama urur baariseed ah marka loo baahdo baaritaan, waarano soo qabasho ama shuruudaha kormeerista.

**Waxaan u oggolahay BCU inay ka hawlgasho codsigan hubinta sooyaalka. Waxaan xaqiijinaya in dhammaan waxyaalaha aan ka dhahay hubintan sooyaalka ay wakhtigan sax yihiin. Waan fahamsanahay inaan u baahanahay inaan sheego wixii taariikh dembi ama taariikh tacaddi ee cusub ee aan ku lumin karo u qalmitaanka oo dhaca kadib markii aan [g1]bixiyo oggolaanshaha iyo marka hubinta sooyaalka wali la sugayo.[/g1] Waan fahamsanahay haddii ay dhacaan isbaddalo, ay tahay inaan siiyo wixii ku soo kordha macluumaadkayga gaarka ah (magaca, cinwaanka, macluumaadka xiriirka), BCU, inta hubintan sooyaalka wali la sugayo. Waan fahamsanahay in haddii aan ka bixiyo macluumaad been ah ama qabyo ah shaqada ku qoran hubinta sooyaalka, dalabkayga la xiri karo ama la i diidi karo. Waan fahamsanahay in macluumaadka iyo dokumentiyada loo soo ururiyo hubinta sooyaalka ay dhici karto in loo isticmaalo go’aamada ku habboonida shaqada.**

**XUQUUQDA IYO OGAYSIISYADA DALBADAHA EE LA XIRIIRA HUBINTA SOOYAALKA**

Dalbade ahaan ay dhici karto inuu maro hubinta diiwaanka taariikhda dembiga faraha la qaado ee qaranka si loo hubiyo in aanu dembi galin (sida dalab shaqo ama shati, meelayn isdirenimo ama xubin qoys oo ku sugan meesha dadka lagu daryeelo, ama cid bixisa guryaha barbaarinta carruurta ama xanaano), waxaad leedahay xuquuq cayiman. Qaybta Hubinta Sooyaalka (BCU), oo ka wakiil ah Waaxda Oregon ee Adeegyada Aadanaha (ODHS) iyo Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA), waxa waajib ah inay ku siiso ogaysiisyo cayiman.

Waxaad ka maraysaa hubinta sooyaalka BCU si loo go'aamiyo inaad ku habboon tahay inaad qabto shaqo la xiriirta daryeelka ama adeegyada dadka nugul.

**Awood-u-siin —** BCU waxa u oggol sharciga gobolka inay samayso hubinaha sooyaalka ee dalbadayaasha u shaqeeya, isdirenimada uga shaqeeya ama la nool dadka u nugul in lagu taccaddiyo ama si xun loola dhaqmo (ORS 181A.195, 181A.200, 181A.215, 409.027, iyo 413.036; OAR 125-007-0200 to 125-007-0330, 407-007-0200 to 407-007-0370, iyo 943-007-000 to 943-007-0501). Dadka nugul waxa ka mid ah carruurta, dadka waayeelka ah iyo dadka naafada ka ah jirka ama maskaxda ama qabo cudurro maskaxeed. Hubin waxa dhici karta in loo baahdo xataa haddii adiga, waa dalbadaha eh, aadan toos ula macaamilin dad nugul.

Iyadoo ku xiran shaqada hubinta sooyaalka aad u marayso, sidoo kale waxa jiri kara hay'ado fadaraalka ah oo kugu samayn kara hubin sooyaal iyagoo eegaya mid ka mid ah waxyaabahan soo socda. Fadlan ka hubi loo-shaqeeyahaaga ama cidda lala xiriiro meelaynta si aad u ogaato haddii arrimahan ku qabanayaan:

- 42USC 1320a – 7(a) - Ka saarista shakhsiyaadka iyo hay'adaha qaarkood inay ka qaybqaataan Medicare iyo barnaamijyada caafimaadka gobolka. Wuxuu u baahan yahay ka-saarid khasab ah oo gaar ah oo ku salaysan xukunnada ku lugta leh xadgudubka ama khiyaanada. Haddii ay ku qabanayso inaad marto hubin ku aaddan liiska Ka-reebitaanka Xafiiska Baaraha Guud (OIG), sharcigan fadaraalku waa mid ku khuseeya.
- 42USC 12645g - Baaritaannada taariikhda dambiga sida ku cad Barnaamijka Deeqda Gobolka Adeegga Bulshada iyo Qaranka, oo u baahan ka-saaritaanada khasabka ah ee tabaruceyaasha qaarkood oo buuxinaya shuruudo gaar ah. Haddii shaqada ama meelayntaada laga maalgaliyo Xeerka Bulshada Qaranka iyo Adeegyada, sharcigan fadaraalku wuu ku qabanayaa.

**Bixinta lambarka Sooshiyaal Sikiyuuriti waa ikhtiyaari —** Bixinta Lambarkaaga Sooshiyaal Sikiyuuriti (SSN) hubintan sooyaal waa ikhtiyaari. BCU ayaa ku codsanaysa awoodda xeerarka iyo qawaaniinta fadaraalka iyo gobolka ee ku qoran dokumentigan si loo dhammaystiro hubinta sooyaalka. Haddii aad bixiso SSN-kaaga, BCU waxay u isticmaali doontaa aqoonsi ahaan si uu uga caawiyo xaqiijinta aqoonsigaaga maadaama dad badan iskaga mid yihiin magaca iyo taariikhda dhalashada. ORCHARDS ayaa sidoo kale hoos gayn

doonta dhammaan diiwaanadaada hubinta sooyaalka SSN-kaaga arrintaasi oo dedejin karta hannaanka hubinta sooyaalka iyo sidoo kale in si fudud kolba meel loogu qaadan karo hubinta sooyaalka iyo waliba in shaqooyinka qaar dadka loo qaadanayo dhakhso loo shaqaalaysiiyo.

**Meelaynta muddada hubinta sooyaalka —**Xeerarka Maamulka ee Oregon (OAR), qawaaniinta Oregon, ama tilmaamaha fadaraalku waxay go'aamin karaan haddii aad ka shaqayn karto ama sii joogi karto shaqo kahor inta aan la dhammaystirin hubinta sooyaalka. Haddii la oggolaado inaad shaqada sii hayn karto, waxa dhici karta in shardi lagaaga dhigo kormeerid joogto ah oo lagugu sameeyo (OAR 407-007-0315). Kahor dhammaystirka hubinta sooyaalka, BCU waxa dhici karta inay kaala laabato awoodda aad ku qaban karto shaqada haddii ay dhacdo in BCU ay kugu hesho dembiyo ama xaalado keenaya inaad lumiso u qalmitaanka oo muujin kara inaad halis ku tahay dadka nugul.

**Meelaha la baarayo —** BCU waxay baaraysaa macluumaadka ay ka hesho Qaybta Adeegyada Darawalka iyo Gaadiidka ee Oregon, Waaxda Oregon ee Xabsiyada, iyo Bilayska Gobolka Oregon. BCU waxay sidoo kale isticmaali kartaa macluumaadka ay ka hesho wakaaladaha caddaaladda iyo dembiyada, xabsiyada iyo sharci fulinta iyo wakaaladaha kale ee dawladda ee heer gobol iyo deegaan, sida Xafiiska Baaritaanka Fadaraalka (FBI) iyo maxkamadaha heer deegaan, gobol iyo fadaraal. Haddii loogu baahdo hubintan sooyaalka, farahaaga ayaa loo isticmaali doonaa in lagu hubiyo diiwaanada taariikhda dembi ee ay hayso FBI-du.

Wixii hubinaha tacaddiga la xiriira, BCU waxay baari kartaa macluumaadka ay ka hesho Xafiiska ODHS ee Tabobarka, Baaritaanada, iyo Badbaadada; Xafiiska ODHS ee Badbaadada, Ilaalaynta iyo Tayada; nidaamka Maaraynta Tacaddiga Dhexe ee DHS; iyo nidaamka tacaddiga ilmaha ODHS, ORKids.  BCU waxay sidoo kale hubin kartaa macluumaadka iyadoo u maraysa maxkamadaha heer deegaan, heer gobol, iyo heer fadaraal.

BCU waxay u isticmaashaa macluumaadka ay hesho kaliya ujeedooyinka loo oggolaaday mana hayn doonto ama u qaybin doonto qaab xadgudub ku ah qawniinta fadaraalka, amarka sharci ama fulineed, ama xeer, habraac ama jaangoyn uu dejiyey Golaha Heshiiska Kahortagga iyo Asturnaanta Dembiga ee Qaranka.

**Bayaanka xeerka Asturnaanta FBI –** Waxa dhici karta in lagu mariyo hubin diiwaanada dembiga oo faraha ah marka la eego codsigan. Macluumaadka soo socdaa waa bayaan shardi ah oo la xiriira faro-qaadista. Bayaankan xeerka asturnaantu sidoo kale wuxuu ku yaalaa gadaasha kaarka faraha FD-258.

Maamulka: Helitaanka, ilaalinta, iyo isdhaafsiga faraha iyo macluumaadka la xiriira ee FBI-da waxa guud ahaan lagu oggolaadaa 28USC 534. Iyadoo ku xiran nooca dalabkaaga, hay'adaha kale waxa ka mid ah qawaaniinta Fadaraalka, qawaaniinta Gobolka iyadoo la raacayo Pub. L. 92-544, Amarrada Fulinta ee Madaxwaynenimo, iyo shuruucda fadaraalka. Bixinta farahaaga

iyo macluumaadka la xiriiraa waa ikhtiyaari; hase yeeshee, haddii sidaas aad yeeli waydo waxa dhici karta inay saamayso dhammaystirka ama ansixinta dalabkaaga.

Ujeedada Koowaad: Go'aamada qaar, sida shaqaalaynta, shati-bixinta, iyo soo caddaynta, waxa dhici karta in lagu saadaaliyo hubino sooyaal oo faraha laga qaaday lagu saleeyay. Farahaaga iyo macluumaadka la xiriira/biometrics waxa la siin karaa wakaaladda shaqaalaynta, baaritaanka, ama haddii kale masuulka ka ah, iyo/ama FBI-da iyadoo ujeedadu tahay isbarbrdhigga farahaaga iyo faraha ku jira nidaamka Aqoonsiga Jiilka Xiga ee FBI-da (Next Generation Identification, NGI) iyo nidaamyadii ka dambeeyey (sida ilaha faraha madaniga, dembiilaha, iyo faraha qarsoon) ama diiwaanada kale ee diyaarsan ee shaqaalaynta, baaritaanka, ama haddii kale hay'adda ka masuulka ah. FBI-du waxa dhici karta inay ku hayso farahaaga iyo macluumaadka la xiriira/biometrics NGI kadib markuu dhammaado dalabkani, inta la hayana, farahaaga waxa dhici karta in la sii wado in loo barbardhigo faraha kale ee la bixiyey ama lagu sii hayay NGI.

Isticmaalada Joogtad ah: Muddada ka hawlgalidda dalabkan iyo muddada ka dambaysa ee ay farahaaga iyo macluumaadka/biometrics-ka la xiriira ay hayso NGI, macluumaadkaaga waxa la shaacin doonaa iyadoo la raacayo oggolaanshaaga, waxaana dhici karta in la shaaciyo adigoon oggolaanin sida uu oggol yahay Xeerka Asturnaanta ee 1974 iyo dhammaan Isticmaalada Joogtada ah ee khuseeyaa sida lagu baahiyo Diiwaanka Fadaraalka, sida Isticmaalka Joogtada ah ee nidaamka NGI iyo Isticmaalka Joogtada ah ee ay Ansixisay FBI-da. Isticmaalka joogtada ah waxa ka mid ah, laakiin kuma koobna, in xogta la siiyo: wakaaladaha shaqaalaynta, kuwa dawliga ah ama kuwa dawliga aan ahayn ee idamka u haysta ee ka masuulka ah shaqaalaynta, qandaraas-bixinta, shati-bixinta, soo caddaynta, iyo go'aaminada kale ee ku habboonaanta shaqada; wakaaladaha heer deegaan, gobol, qabiileed, ama fadaraal ee sharci fulinta; wakaaladaha caddaaladda iyo dembiyada; iyo wakaaladaha ka masuulka ah nabadsugidda qaranka ama badbaadada dadwaynaha.

Fadlan ogow: Oregon waxay leedahay qawaaniin dhigaya burburinta kaararka iyo sawirrada faraha. Fiiri ORS 181A.195.

**Ka doodista macluumaad galitaan dembi —** Waxaad xaq u leedahay inaad ka doodo diiwaankaaga dembiga haddaad rumaysan tahay inuu qaladaad ku jiro. Haddii BCU ay kugu samaysay hubin sooyaal heer qaran oo ku salaysan faraha, waxaad BCU ka codsan kartaa nuqul warbixinta FBI-da ah. Taas baddalkeeda, haddaad rabto inaad hesho nuqul ah diiwaanadaada, ama dood ka keento macluumaadka diiwaanka ku qoran, waa inaad la xiriirto

- Bilayska Gobolka Oregon, 503-378-3070, faraca 330 ama Oregon State Police, Identification Services Section, 3565 Trelstad Ave SE, Salem, OR 97317 (ee diiwaanada dembiyada ee Oregon). OAR 257-010-0035 waxaad ka helaysaa

macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan helitaanka iyo ka doodista Diiwaankaaga Oregon.

- FBI-da, 304-625-3878 ama FBI, kadib tilmaamaha websaytka Hubinaha Guudmarka Taariikhda Aqoonsiga FBI-da (ee diiwaanada dembiyada ee qaranka). Habraaca helitaanka isbaddal, sixitaan, ama cusboonaysiinta diiwaan FBI waxa lagu sheegay Cinwaan 28 CFR 16.34.

Waxaad xaq u leedahay inaad hesho wakhti macquul ah oo kugu filan inaad xaqiijiso saxsanaanta ama dhammaystirnaanta diiwaanadaada dembiyada, ama inaad diido inaad sidaas yeesho, kahor inta aan laguu diidin shaqada sababteeda hubinta sooyaalka loo samaynayo. Iyada oo ku xiran xiriirkii hore ee aad la samaysay sharci fulinta iyo maxkamadaha, waxa laga yaabaa inaad u baahato inaad la xiriirto ilo dhawr ah si aad u hesho diiwaanada dembiyada oo dhammaystiran. Macluumaadka xiriirka ee sharci fulinta iyo maxkamadaha waxa laga heli karaa onlayn iyadoo la isticmaalayo baraha wax laga baaro (search engines).

**Ka doodista macluumaadka gaboodfalka —** Wakhtiga soo bixitaanka natiijada gaboodfalka, waxa dhici karta in lagu siiyo ogaysiin natiijada ku aaddan iyo wixii xuquuq dhanka nidaamka caddaaladda ah, sida rafcaan ama dhagaysi.  Si aad u go’aamiso haddii aad leedahay xuquuq aad dood kaga keeni karto macluumaadka tacaddiga, waxa waajib ah inaad tagto wakaaladda markii hore diyaarisay taasi oo ah halka tacaddiga lagu baaray si aad u hesho tilmaamo dheeraad ah.

Macluumaadka soo socda waxaad ka helaysaa faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan hubinta sooyaalka. Fadlan akhri macluumaadkan.

**MACLUUMAADKA DHEERAADKA AH EE DALBADAHA
EE LA XIRIIRA HUBINTA SOOYAALKA**

**Waxa uu yahay waxa aad ku lumin karto u qalmitaanka** — Akhri macluumaadka faahfaahsan ee ku qoran linkiyada soo socda:

Liiska Dembiyada U Qalmitaanka Lagu Lumin Karo. Turjumadaha: (Carabi) العربية اللغة, 한국어 (Kuuriyaan), Русский (Raashiyaan), Soomaali (Soomaali), Español(Isbaanish), 简体中文 (Shiineys La Fududeeyay), 繁體中文 (Shiineys Qadiimi ah), Tiếng Việt (Fiitnaamiis)

Liiska Gaboolfalada U Qalmitaanka Lagu Lumin Karo. Turjumadaha: (Carabi) العربية اللغة, 한국어 (Kuuriyaan), Русский (Raashiyaan), Soomaali (Soomaali), Español (Isbaanish), 简体中文 (Shiineys La Fududeeyay), 繁體中文 (Shiineys Qadiimi ah), Tiếng Việt (Fiitnaamiis)

Guud ahaan, kuwa soo socdaa waa qaar u qalmitaanka lagu lumin karo:

- Dhammaan xukunada ama qaraarada maxkamadeed ee dembiyadu waxay ku xiran yihiin markii ay dhaceen muddada ka soo wareegtay. Faahfaahinta ku saabsan muddada xukun maxkamadeed loo tixgalin karo inuu keeni karo lumin u qalmitaan (si abadi ah, toban sano, ama ka yar) waxay ku yaaliin xeerarka maamul ee BCU (OAR 407-007-0281).
- Falal dembi oo hadda taagan ama dhawaan ah, oo ay ka mid yihiin laakiin ku koobnayn diiwaangalinta dambiile galmo, dhaqan-wanaag ku sii-dayn ama xabsi dibad-joog, jabinta dhaqan-wanaag ku sii-dayn ama xabsi dibad-joog, iwm., hadday la xiriiraan xukun maxkamadeed oo keeni kara luminta u qalmitaan (OAR 407-007-0290).
- Taariikh la xiriirta adeegyada ilaalinta qof wayn oo ku sifaysan dayac, tacaddi jireed ama jinsi ama uga faa'idaysi dhaqaale oo la baaray Janaayo 1, 2010 ama wixii ka dambeeyey oo adiga lagugu helay inaad gaysatay, sida BCU uga heshay Xafiiska Tabobarka, Baaritaanada iyo Badbaadada (OTIS) iyo Waayeelka iyo Dadka Naafada ah (APD) iyadoo laga duulayo darnaanshaha falka (OAR 407-007-0290(11)).
- Taariikh adeegyada ilaalinta ilmaha ah oo ay qabatay ama heshay waaxdu, iyadoon la eegin nooca tacaddiga ama taariikhda warbixinta hore ee la ogaaday inaad adigu gaysatay (OAR 407-007-0290(11)).

Linkiyada Waaxda Adeegyada Maamul (DAS) iyo ODHS iyo xeerarka hubinta sooyaalka Bixiyaha OHA waxaad ka heli kartaa websaytka Qaybta Hubinta Sooyaalka, bogga Xeerarka iyo Siyaasadda.

Haddii BCU ay ogaato xukuno maxkamadeed ama xaalado ay dhici karto inaad lumiso u qalmitaanka, waxay samayn tijaabo miisaamid si ay u samayso go'aamin ku habboonaansho

oo kama dambaysa ah. Xogsidahan tijaabada miisaamidda (Carabi) اللغة العربية, 한국어 (Kuuriyaan), Русский (Raashiyaan), Soomaali (Soomaali), Español (Isbaanish), 简体中文 ( Shiineys La Fududeeyay), 繁體中文 ( Shiineys Qadiimi ah), Tiếng Việt (Fiitnaamiis) waxaad ka helaysaa faahfaahin ku saabsan tijaabada miisaamidda. Markaad ku sheegto wixii xukuno maxkamadeed ama xaalado ah ee keeni kara luminta u qalmitaanka qaybta oggolaanshaha iyo shaacinta, sidoo kale waxaad heli doontaa dokumentiyo ku xiran oo kale oo kaa caawinaya inaad BCU siiso macluumaad aad u adeegsan karto qiimeynta iyo miisaamidda baadhitaanka. Sidoo kale waxaad fursad u haysataa inaad galiso ama iimeyl ku dirto dokumentiyada la xiriira waxyaalaha aad sheegayso. Fadlan ilaasho ama daabaco dokumentiyadan si aad u tixraacdo mar dambe.

**Waxyaalaha ka soo bixi kara hubinta sooyaalka –** Hubinta sooyaalku wuxuu yeelan karaa mid ka mid ah natiijooyinka soo socda:

- **La ansixiyey:** Hubinta sooyaalkaaga waa mid loo ansixiyey shaqada ku qoran foomkan. Ansixini ma dammaanad qaadi karto shaqaalayn ama meelayn.
- **La ansixiyey iyadoo waxyaalo ka reebban ay jiraan:** Hubinta sooyaalkaaga waa loo ansixiyey inaad qabato shaqada loo sameeyey hubintan sooyaalka, laakiin waxa lagugu koobay macmiil gaar ah, goob gaar ah ama shaqooyin gaar ah. Go'aankan rafcaan waa laga qaadan karaa. Ansixinta waxyaalaha qaar ka reebban yihiin ma dammaanad qaadi karto shaqaalayn ama meelayn.
- **La diiday**: Markii la eegay hubinta sooyaalkaaga, waa lagu diiday. Waxa dhici karta inaadan qaban shaqada ku qoran foomkan waxana waajib ah in dhakhso hawshaada loo joojiyo. Go'aankan waa mid rafcaan laga qaadan karo, laakiin waxa dhici karta inaan laguu dhiibi karin shaqadan muddada rafcaanku socdo.
- **Aan u qalmin**: Haddii ay jiraan xukuno maxkamadeed oo kugu dhacay ama xaalado kale oo kugu keenaya inay ku qabato ka reebitaanka fadaraalku (*tusaale ahaan, Xeerka Bulshada Qaranka iyo Adeegyada, ka reebitaanada shaqooyinka hoos taga Centers for Medicare iyo Adeegyada Medicaid [CMS], iwm.*), BCU waxay soo saari doontaa ogaysiis waxaana dhici karta inaan laguu dhiibin shaqada ku qoran foomkan waxaana waajib ah in si dhakhso ah lagaaga joojiyo. Waxaad yeelan kartaa xuquuq dhagaysi haddii sharciga fadaraalku oggol yahay. Linkiyada soo socda ayaa faahfaahin badan laga heli karaa:
    - Xeerka Bulshada Qaranka iyo Adeegyada, waxa laga heli karaa Xeerka Shuruucda Fadaraalka, Qaybta 2540 Qayb-hoosaadda B (gaar ahaan u qalmitaanka Qaybta 2540.202).
    - Waxyaalaha laga soo reebo Xarumaha Adeegyada Medicaid iyo Medicare (CMS), ee laga heli karo Xeerka Maraykanka, 42 USC 1320a-7.
    - Xeerarka Bixiyaha BCU (fiiri gaar ahaan OAR 407-007-0279(1)).
- **Kiisku waa xiran yahay:** Haddii aadan si dhammaystiran oo sax ah u shaacin taariikhdaada dembiyeed ama aad la shaqayn waydo hannaankan hubinta sooyaalka, waxa dhici karta in dalabkaaga la xiro iyadoon go'aan kama dambays ah laga gaarin. Ma jiraan xuquuq rafcaan, laakiin waxaad awood u yeelan kartaa inaad dhakhso dib ugu dalbato.

Haddaad qabto su'aalo ama u baahan tahay foomkan oo far waawan ku qoran ama foormaat kale ah, la xiriir wakaaladda ku hawlan hubintan sooyaalkaaga.

LIFAAQYADA LAGU ISTICMAALAY DUKUMEENTIGAN

ORS 181A.195, 181A.200, 181A.215:
https://www.oregonlegislature.gov/bills_laws/ors/ors181A.html

ORS 409.027: https://www.oregonlegislature.gov/bills_laws/ors/ors409.html

ORS 413.036: https://www.oregonlegislature.gov/bills_laws/ors/ors413.html

OAR 125-007-0200 to 125-007-0330:
https://secure.sos.state.or.us/oard/displayDivisionRules.action?selectedDivision=227

OAR 407-007-0200 to 407-007-0370:
https://secure.sos.state.or.us/oard/displayDivisionRules.action?selectedDivision=1626

OAR 943-007-000 to 943-007-0501:
https://secure.sos.state.or.us/oard/displayDivisionRules.action?selectedDivision=4201

42USC 1320a – 7(a): https://www.govinfo.gov/app/details/USCODE-2021-title42/USCODE-2021-title42-chap7-subchapXI-partA-sec1320a-7

Liiska ka Reebitaannnnnee Xafiiska Baaraha Guud (OIG): https://exclusions.oig.hhs.gov/

42USC 12645g: https://www.govinfo.gov/app/details/USCODE-2021-title42/USCODE-2021-title42-chap129-subchapI-divsnF-sec12645g

OAR 407-007-0315:
https://secure.sos.state.or.us/oard/viewSingleRule.action?ruleVrsnRsn=284407

FD-258 fingerprint card: https://www.fbi.gov/file-repository/identity-history-summary-request-fd-258-110120/view

28USC 534: https://www.govinfo.gov/app/details/USCODE-2021-title28/USCODE-2021-title28-partII-chap33-sec534

ORS 181A.195: https://www.oregonlegislature.gov/bills_laws/ors/ors181A.html

OAR 257-010-0035:
https://secure.sos.state.or.us/oard/viewSingleRule.action?ruleVrsnRsn=280197

Websaytka Hubinaha Guudmarka Taariikhda Aqoonsiga ee FBI-da:
https://www.edo.cjis.gov/#/

Title 28 CFR 16.34: https://www.ecfr.gov/current/title-28/chapter-I/part-16/subpart-C

Liiska Dembiyada U Qalmitaanka Lagu Lumin Karo: https://www.oregon.gov/odhs/background-checks/Documents/pdq-criminal-tier-3.pdf. (Carabi) اللغة العربية, 한국어 (Kuuriyaan), Русский (Raashiyaan), Soomaali (Soomaali), Español(Isbaanish), 简体中文(Shiineys La Fududeeyay), 繁體中文( Shiineys Qadiimi ah), Tiếng Việt (Fiitnaamiis)

Liiska Gaboodfalka U Qalmitaanka Lagu Lumin Karo: https://www.oregon.gov/odhs/background-checks/Documents/pdq-abuse-provider.pdf: (Carabi) اللغة العربية, 한국어 (Kuuriyaan), Русский (Raashiyaan), Soomaali (Soomaali), Español (Isbaaish), 简体中文 (Shiineys La Fududeeyay), 繁體中文 ( Shiineys Qadiimi ah), Tiếng Việt (Fiitnaamiis)

OAR 407-007-0281: https://secure.sos.state.or.us/oard/viewSingleRule.action?ruleVrsnRsn=287263

OAR 407-007-0290: https://secure.sos.state.or.us/oard/viewSingleRule.action?ruleVrsnRsn=284293

Websaytka qaybta Hubinta Sooyaalka, bogga Xeerarka iyo Siyaasadda: https://www.oregon.gov/odhs/background-checks/Pages/rules.aspx

xogsidaha tijaabada miisaamidda: https://www.oregon.gov/odhs/background-checks/Documents/bcu-weighing-test-providers.pdf. (Carabi) اللغة العربية, 한국어 (Kuuriyaan), Русский (Raashiyaan), Soomaali (Soomaali), Español (Isbaanish), 简体中文 (Shiineys La Fududeeyay), 繁體中文 ( Shiineys Qadiimi ah), Tiếng Việt (Fiitnaamiis)

Qaybta 2540 Qayb-hoosaadda B: https://www.ecfr.gov/current/title-45/subtitle-B/chapter-XXV/part-2540/subpart-B

Qaybta 2540.202: https://www.ecfr.gov/current/title-45/subtitle-B/chapter-XXV/part-2540/subpart-B/section-2540.202

42 USC 1320a-7: https://www.govinfo.gov/app/details/USCODE-2021-title42/USCODE-2021-title42-chap7-subchapXI-partA-sec1320a-7

OAR 407-007-0279(1): https://secure.sos.state.or.us/oard/viewSingleRule.action?ruleVrsnRsn=284291